Ka warbixiyaha Carruurta iyo Qooyska
Ku caawinidda qooysaska inay u qaban-qaabiyaan carruurtooda

(Somali)

Waa maxaay CAFCASS?

Shaqada Talosiinta Maxkamadda Carruurta iyo Qooyska iyo Adeegga Kaalmada – CAFCASS – waa inuu ilaaliyo[1] iyo kor u qaado barwaaqaynta Carruurta qayb ka ah hab-socodsiinada maxkamadda ee qooyska. Waxaan la shaqaynaa Carruurta iyo qooysaskooda, annaga oo sugayno codadka Carruurta in la maqlo iyo wax laga qabto baahidooda.

Waxaan kala talinaa maxkamadaha si ay go'aamada ay qaadanayaan u noqdaan danaha ugu fiican ee Carruurta. Waan ka madax-banaan nahay maxkamadaha, adeegyadada bulshada[2], maamulada waxbarashada iyo caafimaadka iyo hay'adaha la midka ah. Waxaan ka shaqaynaa oo keliya maxkamadaha qooyska.
Kuwaani ma aha maxkamadaha dembiyada.

[1] Xeerka Carruurta ee 2004 waxuu ku amar ku saarayaa waajib sharci ah ururada iyo hay'adaha la shaqeeyo carruurta si ay u sameeyaan qaban-qaabooyinka lagu ilaalinaayo korna lagu qaadayo barwaaqaynta Carruurta, gaar ahaan xaaladaha caafimaadeed, nabadgelyo, raaxaysi iyo gull-gaarsita wax ku biirinta fiican iyo gaarista barwaaqo dhaqaale.
[2] Waxaa loola jeedaa erayga 'adeegyada bulshada ' ee ku jiro bug-yarahaan, la shaqaynta maamulada deegaanka ee wax ka qabashada hawshooda adeegyada bulshadeed, iyo gaar ahaan xanaano bulshadeedka Carruurta.

Maxay yahiin ka soo warbixiyayaasha Carruurta iyo Qooyska maxayna sameeyaan?

Ka soo warbixiyayaasha Carruurta iyo Qooyska waxay yahiin kuwo tabobaran oo waayo-aragnimo u leh la shaqaynta Carruurta iyo qooysaska. Waxaa maxkamado badan laga waydiistaa inay ka caawiyaan qooysaska inay isku dayaan inay oggolaadaan qaban-qaabooyinka loo samaynaayo Carruurtooda. Haddii aan la gaarin heshiis, waxaa ka soo Warbixiyayaasha Carruurta iyo Qooyska la waydiisan karaa inay:

- sii wadaan inay la shaqeeyaan qooyska sidii ay xal uga helaan arrimaha taagan,

  iyo/ama.
- inay sameeyaan baaris iyo inay u soo qoraan warbixin maxkamadda

Maxaa ka dhacaayo Tusaalooyinka Dhegaysiga Koowaad?

Tusaalooyinka Dhegaysiga Koowaad maxkamadda waxay ku gaaraysaa go'aamada ku saabsan sida horay loogu sii socon lahaa codsiga loo soo samaystay ee ku saabsan carruurta. Waxaa kale la go'aaminayaa waqtiga la dhegaysanaayo arrinta. Waxaa dhegaysiga lagu qabanayaa maxkamadda waxaana ka soo qaybgalaayo dhinacyada arrinta, wakiiladooda sharciyeed iyo sarkaalka maxkamadda. Warbixiyaha Carruurta iyo Qooyska wuxuu maxkamadaha intooda badan xitaa ka soo qaybgeli karaa Tusaalooyinka Dhegaysiga Koowaad. Waxyaabaha kale oo laga tixgelin karo dhegaysiga waxay noqon karaan:

- arrimo kasto ee ah badbaadinta cunugga, iyo
- suurto-galnimada ah inay dhinacyada ay heshiis gaaraan iyada oo ay maxkamadda sii wadin arrinta.

Sideey iskugu dayaan ayna uga gaarayaan heshiis?

Waxay maxkamadda waydiisan kartaa ka soo Warbixiyaha Carruurta iyo Qooyska inuu la kulmo adiga iyo waalidka kale ama dhinaca kale ee hab socodsiinada si loo arko in la heli karo xal iyo haddii la gaari karo heshiis. Waxaa sidaan loo yaqaanaa xal ka gaarista muranka. Waxaa la soo jeedin karaa wada fadhi loo dhan yahay laakin waxaad mar kasto xaq u lee-dahay in kaligaaga laguu arko.

Waxaa mar-mar lagu waydiisan karaa inaad horay ugu soo wadatid cunuggaaga ama carruurtaada fadhiga ama qaban-qaabooyinka si loogu arko si gooni-gooni ah. Waxay tani ku xiran tahay nidaamka deegaan ahaan loogu xalliyo muranka, nooca codsiga iyo da'da cunugga.

Waxaa arrimo badan ee ku saabsan qaar ama dhammaan arrimaha laga gaaraa heshiis inta lagu jiro fadhiga. Waxay maxkamadda ka dib oggolaanaysaa in ay sugto xilli yar sidii ay u aragto haddii uu heshiiska shaqaynaayo.

Haddii heshiis si deg-deg ah loo gaarin soo Warbixiyaha Carruurta iyo Qooyska waxuu ku talin karaa in la qabto fadhiyo dheeraad ah si layskugu dayo in lagu xalliyo dhibaatooyinka. Waxaa loogu qaban karaa mid ka mid ah xafiisyadeena intii lagu qaban lahaa maxkamadda.

Waxuu ka soo Warbixiyaha Carruurta iyo Qooyska soo jeedin karaa in dhex-dhexaadin ay caawinaad ka gaysan karto. Dhex-dhexaadinta waa hab ah iskaa wax u qabso oo ay waalidiinta kula kulmi karaan qof madax-banaan si layskugu dayo in la xalliyo muraanada. Waxay fadhiyada dhex-dhexaadinta yahiin kuwo kalsooni leh ilaa aysan labada waalid ay ku heshiiyaan in wararka la gudbiyo ama haddii uu dhex-dhexaadiyaha u malaynaayo in loo baahan yahay baaritaano dheeraad ah si loo badbaadiyo Carruurta.

Waxaa lagugu siinayaa xal u helidda muranka iyo fadhiyada dhex-dhexaadinta fursad aad kula hadashid, kuna dhegaysatid aragtida dhinac kasto. Waxay kaa caawini karaan inaad go'aan ka gaartid waxaa ugu fiican carruurta intii ay maxkamadda kuu go'aamin lahayd.

Maxaa dhacaayo haddii weli laga gaarin heshiis?

Haddii arimaha weli laga gaarin heshiis, waxay maxkamadda waydiisanaysaa ka soo Warbixiyaha Carruurta iyo Qooyska inu ka qabto shaqo dheeri ah ama baaritaano iyo inuu uga soo qoro warbixin ku saabsan waxa ay u malaynayaan inuu dan fiican u yahay carruurta. Waxay warbixinta sheegaysaa baaritaanada la soo sameeyay waxaana lagu soo bandhigayaa talosiinta fiican ee ku saabsan sida ugu fiican ee horay loogu sii dhaqaajin karo. Waxaa sidaasi ka mid noqon karo in si dheeri ah loola shaqeeyo

qooyskaaga. Inta badan waxay qaadanaysaa qiyaasti toban toddobaad si loo soo bandhigo warbixinta. Waxaa iska caadi ah in heshiis lagu gaaro waqtigaan. Markii la soo dhammeeyo warbixinta, waxaa loo gudbinayaa maxkamadda. Waxaa kale oo loo dirayaa qareenka haddii aad mid lee-dahay, ama si toos ah ayaa laguugu soo dirayaa haddii aadan lahayn.

Yuu doonayaa inuu la hadlo ka soo Warbixiyaha Carruurta iyo Qooyska?

Waxuu marka horey ka soo Warbixiyaha Carruurta iyo Qooyska u baahan yahay inuu adiga kula hadlo iyo dhinaca kale ee hab-socodsiinada. Haddii ay jiraan arrimo dagaala ama rabsho markaa waxuu idin arkayaa si gooni ah ka dibna si wadajir ah haddii ay habboon tahay iyo haddii aad labadiinuba oggoshahiin. Waxuu kale uu ka soo Warbixiyaha Carruurta iyo Qooyska doonayaa inuu la kulmo iyo inuu la hadlo carruurtaada. Si go'aan looga gaaro waxa ugu fiican carruurta waxay maxkamadda u baahan tahay inay ogaato waxay rabaan iyo waxyaabaha ay dareensan yahiin. Waa qayb ka mid ah doowrka ka soo Warbixiyaha Carruurta iyo Qooyska inuu u sheego maxkamadda waxa ay yahiin kuwaani.

Markii ay la hadlaan carruurtaada, adiga iyo dhinaca kale ee habsocodsiinta, waxay ka soo Warbixiyaha Carruurta iyo Qooyska mar-mar u baahan yihiin inay la hadlaan dad kale oo siin karo warar ku saabsan adiga ama carruurtaada. Waxuu sidaan noqon karaa, tusaale ahaan, takhtarka, baraha, takhtarka soo booqdo ama hawlwadeenka bulshada. Waxay maxkamadda codsan kartaa in qof gaar ah lala xiriiro. Waxuu ka soo warbixiyaha Carruurta iyo Qooyska kuu soo sheegayaa qofka lala hadlaayo waxuuna ku waydiisanayaa oggolaanshahaaga haddii loo baahan yahay.

Waa iska caadi in la waraysto booliska, adeegyada bulshada (uu ku jiro diiwangeliyaha difaaca Carruurta) iyo in la fiiriyo wararka ay horey u haysteen CAFCASS.

Ma sirbaa waxa aan u sheegaayo ka soo Warbixiyaha Carruurta iyo Qooyska?

Warar kasto oo aad siidid ka soo Warbixiyaha Carruurta iyo Qooyska waxaa lagu soo deri karaa warbixinta la siinaayo maxkamadda, waxaana wararka loo soo gudbin karaa ujeeddooyin kale. Tusaale ahaan, waxaa mar-mar laga maarmaan ah in wararka loo soo gudbiyo hay'ad kale haddii ay khusaydo nabadgelyada cunugga. Waxaa taasi u dheer, inaan u haysano fasax aan ku samaynayno baaris faa'iido u ah carruurta iyo qooysaska waxaana waqti ka waqti wararkana loogu isticmaali karaa si aan magac lahayn baaristaas.

Miyaan arki doonaa waalidka kale ama qofka kale oo ka qayb gelaayo?
Maya, haddii aadan doonayn. Waa la soo jeedin karaa fadhi wadajir ah, laakin waxaad mar kasto u lee-dahay xaq in iskaa laguu arko.

Miyay maxkamadda samaynaysaa waxa uu cunuggayga doonaayo?
Waxay maxkamadda tixgelinaysaa waxyaabaha ay caruurta dareensan yihiin iyo rabaan, iyada ku xisaabtamayso da'dooda iyo garashadooda. Si kastaba ha noqotee, maxkamadda ma samaynayso wax kasto uu cunugga doonaayo markii ay go'aan gaarayso, laakin waxay eegaysaa inay samayso waxa ay u malaynayso inuu aad ugu fiican yahay cunugga.

Miyay maxkamadda mar kasto samaynaysaa waxa ay Carruurta iyo ka soo Warbixiyaha Carruurta iyo Qooyska kula taliyaaan?
Waxaa go'aaminayso maxkamadda waxa dhici doono, laakin waxay maxkamadda si taxadir leh ula soconaysaa waxa ay carruurta iyo ka soo Warbixiyaha Carruurta iyo Qooyska u sheegayaan. Haddii maxkamadda ku raacsanayn waxa uu ka soo Warbixiyaha Carruurta iyo Qooyska ku soo taliyay waxay soo mcinaynaysaa sababta.

Miyaa lagu xisaabtamayaa aragtiyadayda?

Waxaan soo dhowaynaynaa waxii war soo celin ah ee ku saabsan dhammaan adeegyadeena iyo wax-qabadyadeena bacdamaa ay qayb muhiim ka yahiin horumarinta iyo sii hagaajinta adeeggeena. Waxaan jeclaan lahayn inaan ka war-helno dhammaan kuwa isticmaalo adeeggeena-carruurta iyo dadka dhallinta yar, waaliddiinta, qaraabada, maxkamadaha ama hay'adaha kale.

Waxay war soo celintaan noqon kartaa:

- **Faallada** ku saabsan siyaasadaha CAFCASS ama ka shaqaynta waxqabadyada ama dhinac kale ee adeegga
- **Boogaadin** ku saabsan shaqadeena ama ka soo Warbixiyaha Carruurta iyo Qooyska oo gooni-gooni ah
- **Cabashada** ku saabsan dhinac kasto ee xiriirada aad nala yeelatay.

Waxaan diiwaan-gelinaynaa, waana la soconaynaa waana dib u eegaynaa dhammaan faallooyinka, cabashooyinka iyo boogaadinta ku saabsan adeegyadeena, waxaana natiijooyinka lagu soo daabacayaa Warbixinteena Sanadeedka.

Sidii loo daneeyo horumarinta adeegyada iyo ujeeddo baaris awgeed, waxaa surto gal ah inaan kula soo xiriirno si aan u helno aragtiyadaada markii la dhammaystiro hab-socodsiinada.

Sidee dib ugu soo warcelinayaa faallooyinka iyo boogaadinta?

U soo gudbi waxii faallooyin ama boogaadin ah (ayagoo qoraal ah) ka soo Warbixiyaha Carruurta iyo Qooyska ay khuseeyaan, ama u soo dir maareeyaha CAFCASS ee deegaanka, cinwaanka wuxuu ku xusan yahay xagga dambe ee bug-yaraha. Waxaad kale aad u soo diri kartaa faallooyinkaaga ama aragtiyadaada xafiiskeena qaranka iyada oo aad soo marinaysid: yourviews@cafcass.gov.uk.

Waxaad arrintaada dhammaadkeeda Warbixiyaha Carruurta iyo Qooyska ee ka qaybgalay arrintaada ama maareeyahooda ka codsan kartaa fadhi dib war u soo celin.

Maxaa dhacaayo haddii aanan ku faraxsanayn adeegga ay samayso CAFCASS?

Waxaan danaynaynaa inaan u samayno adeeg leh tayo sare dhammaan hab-socodsiinada qooyska, iyo inaan siino carruurta cod waqtiga muhiimka ee noloshooda. Waxaa muhiim inoo ah inaan ogaano markii u isticmaalayaasha adeegga ay rumaysan yahiin inaan ka gaari wayney ujeeddooyinkaan.

Waxaan lee-nahay habka cabashooyinka ee loogu talogalay in lagu sugo in cabashooyinka wax looga qabto si deg-deg ah, caddaalad leh iyo si wax ku ool ah sida suurto galka ah. Waxaa soo raacaayo soo bandhigidda habka cabashooyinka. Waxaa loogu soo bandhigay si buuxdo habka bug-yaraha ku isticmaalayaasha adeegga[3], oo laga heli karo xafiiska deegaanka ee CAFCASS ama laga geli karo qaybta *macluumaadka* ee shabakaddeena ah: www.cafcass.gov.uk.

Maxaa dhacaayo haddii aan doonaayo inaan soo sameeyo cabasho?

Marka ugu horreya, waa inaad mar kasto soo ogaysiidaa ka soo Warbixiyaha Carruurta iyo Qooyska ay khusayso haddii aadan ku faraxsanayn kasto ee adeegga. Waxaa dhicin karto in loo helo fursad lagu saxo waxyaabaha. Taa beddelkeeda waxaad soo waydiisan kartaa fadhi dib war u soo celin arrintaada markii ay dhammaato sida lagu faah-faahiyay bogga hore.

Haddii aadan jeclayn inaad sidaasi samaysid oo aad rabtid inaad soo samayso cabasho, markaa la soo xiriir maareeyaha CAFCAAS-ka deegaanka sida ugu deg-degsan ee suurto galka ah.

[3] Aragtiyadaada waa Muhiim – Sida loo sameeyo faallo, boogaadin ama cabasho eek u saabsan shaqadeena

Haddii aadan ku raacsanayn waxyaabaha ku jiro warbixinta, waxaa sida caadiga ah aad u fiican inaad soo sheegtid markii lagu jiro dhegaysiga maxkamadda.

Suurto gal ma ahan in la beddelo natiijada ka soo baxday go'aanka maxkamadda markii cabasho la sameeyo. Haddii aadan ku raacsanayn go'aanka ay gaartay maxkamadda waxaad u baahanaysaa inaad raadsatid talosiin sharciyeed ee ku saabsan racfaan ka qaadashada go'aanka maxkamadda .

Waxaa muhiim ah inaad la socotid inuu jiro waqti xad leh oo aan ku oggolaanayno cabashooyinka. Waxay dadka qaangaarka ah u lee-yahiin seddax bilood laga soo bilaabo dhacdada shilka. Fadlan soo xigo buug-yaraha uga hadlaayo faah-faahinta buuxdo xadidaadda waqtiga oo ah *Aragtiyadaada waa muhiim*.

Waxaa naga sugaysaa caddaynta ah inaan helnay cabashadaada shan maalin shaqo gudahood.

Cabashooyinka ka imaanaayo Carruurta waxaa la qabanayaa waqti kasto. Cunugga jecel inuu soo samaysto cabasho waxaa la siinayaa ku kaalmaynta qareen madax-banaan inta lagu jiro hab-socodka.

Nabadgelyada Cunugga

Waxaan hay'adaha kale la sameynaa baaritaanyo si aan u ogaano haddii ay carruurta aku jiraan halis micnaawi ah inuu wax gaaro. Waxaa ka mid ah markii ay carruurtaas goob-joog ka yahiin dagaalka guriga. Waxaa lala samaynayaa baaritaan joogto ah booliska, adeegyada bulshada iyo Diiwaangeliyaha Difaaca Carruurta. Waxaan kuu soo sheegaynaa haddii loo baahan yahay baaritaano dheeri ah ee lala samaynaayo hay'ado dheeri ah (tusaale,Takhtarka Guud, dugsiyada). Waxaa wararka loo isticmaalayaa diyaarinta warbixinta maxkamadda waxaana lala qaybsan karaa adeegyada bulshada.

Ma kugu siinayno gacan qaban-qaabooyinka halis gelinaayo nabadgelyada carruurta ama dadka dhallinta yar iyo xannaaneeyayaashooda.

Kala duwanaanta

Waxaan danaynaynaa inaan u noqono hormuud baahida shakhsiyeed ee carruurta iyo xushmaynta iyo qiimaynta jaaliyada kala duwan oo ay ku korayaan. Waxaan diiwan-gelinaynaa oo aan la soconaynaa wararaka ku saabsan kala duwanaanta ee isticmaalayaasha adeeggeena- oo ah sida asalka jinsiga, luqadda iyo baahida gaarka u ah- si aan awood u helno inaan sii hagaajino tayada adeeggeena carruurta iyo qooysaska. Waxay kale ay wararkaan naga caawinayaan inaan horay u sii dhigno sinnaanta sida uu faraayo sharciga oo ay ka mid yahiin Xeerka Xiriirka Jinsiga 1976 (oo la beddelay 2000 iyo 2003) iyo Xeerka Takooridda Naafonimada 1995 iyo 2005.

Macluumaadka

Sharciga ayaa nidaamiyo habka aan u soo uruurino, u socodsiino una diyaarino macluumaadka. Waxaa dan kuu noqon karo nuqdhooyinka soo socdo:

- Dabeecadda ay shaqadeena lee-dahay waxay naga dalbanaysaa socodsiinta wararka qof-ahaaneed ee ku saabsan isticmaalayaasha adeeggeena. Waxay dhammaan wax-qabadyadaasi wax looga qabtaa sida u waafaqsan Xeerka badbaadinta Faah-faahinada Shakhsiyadeed ee 1998. Waxyaabaha ku jiro Diiwaanka Badbaadinta Faah-faahinta Shakhsiyadeed waxaa laga heli karaa: www.cafcass.gov.uk
- Sida uu qabo Xeerka Badbaadinta Faah-faahinta Shakhsiyadeed, waxaad xaq u lee-dahay inaad soo waydiisato nuqulada macluumaadka aan kaa hayno ee kugu saabsan
- Waxaan ballan-qaadaynaa inaad ku soo siino macluumaadka ku saabsan adeeggeena sida uu qabo Xeerka Xuriyadda Macluumaadka 2000.

Waxii faah-faahino dheeraad ah ee ku saabsan sida aan ugu shaqayno Xeerka Badbaadinta Faah-faahinta Shakhsiyadeed ama Xeerka Xuriyadda Macluumaadka, fadlan u booqo qaybta *macluumaadka* ee shabakadeena oo ah www.cafcass.gov.uk ama kala xiriir xafiiskeena deegaanka ee CAFCASS.

Waxaa kale ku jiro shabakaddeena macluumaad dheraad ah ee ku saabsan baaxadda buuxdo ee adeegyadeena.